Ilaahay markuu ku xugmiyo adoon inuu ku dhinto dhul, dhulkaas ayaa Ilaahay dan ka geliyaa

Madar Binu Cukaamis Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: Ilaahay markuu ku xugmiyo adoon inuu ku dhinto dhul, dhulkaas ayaa Ilaahay dan ka geliyaa.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi]

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay: in Ilaahay haduu ku xugmiyo oo ku qadaro adoon inuu ku dhinto dhul uusan markaa joogin, Ilaahay wuxuu ka geliyaa dhulkaa dan uu ku tago, markuu tagana nafta looga qaada.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65040